

Wargeyska Mountain View

Diseembar 2, 2015

Qamiis, Diseembar 3.....Guddiga Bulshada Dugsiga, 3:30 p.m.
Talaado, Diseembar 8.....Shirka Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha 8:15 a.m.
Isniin, Diseembar 21 - Janaayo 3.....Ma Jiro Dugsi, Nasashada Qaboobaha
Isniin, Janaayo 4.....Resumeeyada Dugsiga

Fariinta Agaasimaha

Dhawaanahaan, waxaan wargeyskaan ku qoray baahida loo qabo taageeradaada si loo xoojiyo waxa dugsiga ka filayo ardayda oo ah in ay raacaan tilmaamaha marka kowaaad ee la siiyo, in aan ceshano gacmahena, cagahena, iyo alaabtena, iyo in aan yeelano naxariis xagga isticmaalka erayada iyo ficilka. Waxaan iminka rabaa in aan qof kasta oo arka ardaydena oo naxariis ku muujisa erayo iyo ficil, in ay fadlan qoraal gaaban u soo qoraan xafiiska ama in ay nagu soo gaarsiyaan si kale. Waxaan rabaa in aan aqoonsano ardaydena, dugsiga, shaqaalaha, iyo qoysaska bacdamaa ay muujiyeen sida ay u daneyaan. Waxaan rajeyneynaa in aan goor dhaw maqalno sheekooyinkaada.

Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, in ay kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maaalinta Talaadada, Nofembar 8, marka ay tahay 8:15 a.m. Dhowrkii todobaad ee la soo dhaafay waxay ahayd wax lagu farxo in aan halkaas ku aragno dhowr aabeyaal. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Barnaamijka Waxbarashada Fidsan Dugsiga Dagmada Salt Lake City (ELP) Macluumaadka Qiimeynta Takhasuska Dugsiga Hoose Sannad Dugsiyeeka 2016-2017

Barnaamijka Waxbarashada Fidsan Dugsiga Dagmada Salt Lake City waxaa laga helaa adeegyo ku takhasusa waxbarashada la siiyo ardayda loo aqoonsado in ay qabaan hibbo iyo ardayda kartida sare dugsiga hoose darajada K-6^{aad}. Adeegyada ELP waxaa laga helaa dhamaan dugsiyada hoose dagmada, halkaas oo adeegyo badan oo fidsan laga qaato ELP Magnet Programs (Barnaamijyada Takhasuska ELP) ee Emerson, Hawthorne, iyo Whittier. Shirarka Macluumaadka Waalidka waxaa la qaban doonaa maalinta Arbacada, Janaayo 6, iyo maalinta Arbacada Janaayo 13, 2016, marka ay tahay 6:00 pm, qolalka 112-114, xafiisyada Dugsiga Dagmada Salt Lake City.

Sida qeyb ka tirsan hawsha xaq u yeelashada sannad dugsiyeedka 2016-2017, ardayda hobbada leh iyo kuwa kartida sare balse aan weli gaarin dugsiga ilaa ardayda darajada 5^{aad} waxay ka qeybgeli karaan imtixanaadka laga bilaabo Janaayo 6, 2016 ilaa Febraayo 19, 2016. Diiwaan Gelinta waxay furan tahay laga bilaabo Nofembar 3, 2015-Febraayo 11, 2016.

Foomamka K-6 Application and Disclosure Statement (Arjiga iyo Oraahda Horudhaca K-6) waxaa laga helaa bogga internetka Dugsiga Dagamada Salt Lake City School District's ELP. Bogga internetka waa <http://www.slcschools.org/departments/curriculum/extended-learning-program>, ama la xariir Amy Burris, ELP Department Administrative Assistant (Kaaliyaha Maamulka Waaxda ELP), telefoonka 801-578-8573 si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

Xanaanaada ilaa ardayda darajada 3aad iyo qoysaskooda waa in ay daggan yahiin, iyo waa in ay sii dagganaadaan, gudaha Dagmada Dugsiga Salt Lake City si loo qiimeeyo ama si ay uga qeybgalaan Extended Learning Program (Barnaamijka Waxbarashada Fidsan)